State of Oregon
Employment Department

Qaanuunka Ku-meelgaarka ah ee Waaxda Shaqaalaysiinta ee Dheefta Dabacsan ee Caymiska Shaqa la'aanta

Markay ahayd Maarso 8, 2020, Guddoomiye Brown wuxuu soo saaray Amar Fulinta Lambarka 20-03 isagoo ku dhawaaqaya xaalad deg-deg ah oo gobolka oo dhan ah iyadoo sabab ay u tahay cudurka Coronavirus ee faafa. Tan iyo markaas, saameynta fayraska iyo dadaallada lagu yareynayo faafitaankiisa ayaa saameyn ballaaran ku yeeshay shaqaalaha iyo ganacsatada Oregon. Nidaamka caymiska shaqo la'aanta ayaa ujeedadiisu tahay inuu caawiyo shaqaalaha iyo ganacsiga, iyo bulshada ay ku dhexjiraan, inta lagu jiro waqtiyada shaqada ay curyaansan yihiin. Qaanuunkani wuxuu dejinayaa qodobada caymiska shaqo la'aanta ee ku habboon xaaladaha gaarka ah ee ka dhashay COVID-19 iyo tallaabooyinka lagu yareynayo faafitaankiisa. Haddii aan si kale loo dhigin, qodobbada qaanuunkan ayaa mar kale dib loogula dhaqmayaa Maarso 8, 2020, markii lagu dhawaaqay xaaladda degdegga ah ee gobolka oo dhan.

(1) Xaaladaha soo socda waxaa loo qaadanayaa inay yihiin " xaalado COVID-19 la laxiriira":

(a) Qofku ma awoodo inuu shaqeeyo maxaa yeelay waxay la jiran yihiin fayraska Korona;

(b) Qofku ma awoodo inuu shaqeysto maxaa yeelay waxay u dhawdahay inuu qaaday fayraska korona waxaana lagu soo rogay xilli karantiil khasab ah;

(c) Qofku ma awoodo inuu shaqeeyo maxaa yeelay waxaa la taliyay daryeel bixiyahooda caafimaad ama talo ay soo saareen saraakiisha caafimaadka dadweynaha oo ah inay is-karantiilaan iyadoo la baqayo khatarta suurtagalka ah ee qaadista, ama faafida fayraska Koronal;

(d) Qofku ma awoodo inuu shaqeeyo sababta oo ah loo-shaqeeyahooga wuxuu joojiyay ama yareeyey howlihiisii fayras korona awgii, oo ay ku jiraan xiritaannada ama yaraynta ku saleysan tilmaamaha ama talada Guddoomiyaha ama saraakiisha caafimaadka dadweynaha;

(e) Qofku ma awoodo inuu shaqeeyo sababta oo ah waa inuu joogo guriga si uu u daryeelo xubin reerka ka mid ah, ama qof kale oo ay la nool yihiin ama ay u fidiyaan daryeel, kaasoo la il daran fayraska korona ama ku qasban karantiil khasab ah;

(f) Qofku ma awoodo inuu shaqeeyo sababta oo ah waa inuu joogo guriga si uu u daryeelo ilmo kadib xidhitaanada iskuulada, bixiyayaasha xanaanada ilmaha, ama xarumaha la midka ah iyadoo uu sabab u yahay fayraska korona; iyo

(g) Qofka laga codsado inuu shaqeeyo iyadoo ay ku qasbayso inay ku kacaan ficil ku xadgudbayo karantiilka khasab ah ama amarka gudoomiyaha ee ku saabsan xaddididda howlaha si loo xaddido faafidda fayraska korona.

(2) Ka reebista dheefaha caymiska shaqo la'aanta. Dadka kama reebano in ay helaan dheefaha caymiska shaqo la'aanta hadii ay jiraan xaaladahaan soo socda (in kasta oo ay wali tahay inay buuxiyaan shuruudaha u qalmidda toddobaadlaha ah ee lagu helayo dheefaha):

(a) Qofka waxaa shaqada looga saaraa xaalad laxiriirta COVID-19 (ORS 657.176 (2) (b));

(b) Qofku shaqada wuu iskaga daayay xaalad la xiriirta COVID-19 darteed (ORS 657.176 (2) (c));

(c) Qofka oo ku guuldareysto inuu codsado shaqo markii ay soo gudbiyeen xafiiska shaqada ama agaasimaha sababtuna tahay xaalad laxiriirta COVID-19 (ORS 657.176 (2) (d)); ama

(d) Qofku inuu diido inuu aqbalo shaqo-siin sababtuna tahay xaalad la xiriirta COVID-19 (ORS 657.176 (2) (f)).

(3) Awood u leh inuu shaqeeyo - ORS 657.155 (1) (c) sharciga federaalkuna wuxuu farayaa in qofku awoodo inuu shaqeeyo si uu u helo dheefaha caymiska shaqo la'aanta.

(a) Qofka looma arki doono inuusan shaqeyn karin sababta oo ah:

(A) Waxaa karantiilay bixiyahooda daryeelka caafimaad, ama talo ay soo jeediyeen saraakiisha caafimaadka bulshada si ay iskood isu karantiilaan halista suurtagalnimada qaadista la xiriirta awgeed, ama faafida fayraska korona, balse aan jiranayn;

(B) Waxay guryahooda ugu bukoodaan fayraska korona ama xaalad leh astaamaha la midka ah hergabka oo aynan diidin shaqo bixin tan iyo markii ay guri joogidda bilaabeen jirro darteed; ama

(C) In isbitaal la dhigo, ama hay'ad daryeel kale oo habeysan, oona ay ugu wacan tahay fayraska korona, laakiin wax ka yar kalabar toddobaadka, oona aynan diidin shaqo-siin toddobaadkaas.

(b) Inuu qofku awoodin inuu shaqeeyo toddobaad gudihiis haddii loo soo bandhigo shaqo ku habboon oo uusan aqbalin sababta oo ah waxay la jiran yihiin fayraska korona, ama xaalad leh astaamaha hergabka.

(4) Si firfircoon u raadsanaya shaqo - ORS 657.155 (1) (c) sharciga federaalkuna wuxuu farayaa qofka inuu si firfircoon u raadsado shaqo si uu u helo dheefaha caymiska shaqo la'aanta. **Sharciga federaalka ee Gurmad Fayraska-korona ee Qoyska Hore (The federal Families First Coronavirus Response Act) wuxuu u oggolaanayaa gobollada inay si ku-meelgaar ah wax uga beddelaan sharciyadooda caymiska shaqo la'aanta ee ku saabsan shuruudaha shaqo raadinta ee ku saleysan xaaladda degdegga ah si looga jawaabo faafidda COVID-19 (Qeybta 4102 (b)). Muhimadda asaasiga ah ee caafimaadka bulshada iyo badbaadada yareynta faafitaanka COVID-19 awgeed, tallaabooyinka fogeynta bulshada waa in la ilaaliyaa. Sidaas darteed, laga bilaabo todobaadka dhammaanaya 28-ka Maarso, 2020, marka laga soo tago OAR 471-030-0036, in qoraal aan lagu ogaysiiyo ma'ogiye Waaxda Shaqaalaysiinta, qofka waxaa loo tixgelin doonaa inuu si firfircoon u raadsanayo shaqo ujeedooyinka ah ORS 657.155 haddii ay rabaan inay raadsadaan Shaqo markaa bayaanada deg-degga ee gobolka iyo maxalliga ee la xiriira fayraska korona ay dhacayaan ama aysan shaqeynaynin.**

(5) Shaqo u diyaar ah - ORS 657.155 (1) (c) sharciga federaalkuna wuxuu farayaa in qofka diyaar u yahay shaqo si uu u helo dheefaha caymiska shaqo la'aanta. Qofka looma tixgelin doono inuu diyaar u yahay shaqo sababta oo ah:

(a) Waxay joogaan guryahooda, ama waa la karantiilay, iyada oo ay ugu wacan tahay halista qaadista, ama faafida fayraska korona ayna raaceen talada bixiyaha daryeelka caafimaad ama talo ay soo saareen saraakiisha caafimaadka dadweynaha ama amarka sarkaal dawladeed, xitaa haddii loo shaqeeyahooda uu u hayo iyaga shaqo ay qaban kari lahaayeen;

(b) Inay joogaan guryahooda sababta kaliyana ay tahay inay la'yihiin daryeel xanaaneeyn ilmo ama caruur kadib xiritaanka iskuulka ama xiritaanka xanaano-maalmeedka ama xannibaadaha;

(c) Waxay joogaan gurgaha si ay u xanaaneeyaan xubin qoyska ah sababtuna la xiriirta saameynta fayraska korona; ama

(d) **Inay caadi ahaan shaqeeyaan wax ka yar waqti-buuxa waxayna kaliya diyaar u yihiin wax ka yar shaqo waqti-buuxa ah.**

(6) ORS 657.315 (2) wuxuu oggol yahay ka-dhaafitaanka soo-celinta lacag-bixinta dheeraadka ah haddii lacag-bixinta dheeraadka ah uusan sinnaba u sababin dacwoodaha iyo in soo-celinta ay ka hor imaanayso sinnaanta iyo damiirka wanaagsan. Marka laga soo tago OAR 471030-0053, dheefta la bixiyay toddobaadyo kana bilaabanaya todobaadka dhammaanaya bisha Maarso 28, 2020, marka loo eego duruufaha dhaqaale ee uu abuuray fayraska korona iyo tillaabooyinka loo qaaday yareynta faafitaankiisa, soo-celinta lacag-bixintaan dheeraadka ah waxay ka hor imaanaysaa sinnaanta iyo damiirka wanaagga. Dadaallada soo-ceelinta ayaa dib loo bilaabi karaa kadib marka bayaanada deg-degga ee la xiriira fayraska korona ay dhacaan ama aan la dhaqan-geli karin.